



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Noofambar 4, 2021

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Tallaalka Pfizer ee COVID oo loo oggolaaday da'aha 5 ilaa 11

Nooca carruurta ee tallaalka COVID-19 ee Pfizer ayaa la heli doonaa toddobaadkani kaasi oo loogu talagalay carruurta ay da'doodu tahay 5 ilaa 11 ee ku nool Oregon. Tallaalka Pfizer ee loogu talagalay koox da'eedkani waa qiyaas yar oo dhan (10 micrograms) marka loo eego tallaalka Pfizer ee loogu talagalay da'aha 18 jir iyo ka weyn (30 micrograms).

Tallaalka ayaa helay oggolaanshaha u isticmaalka xaalada degdega ah (EUA) ka dib u eegis ay sameeyeen Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka ee Maraykanka (FDA) iyo Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC) iyo Western States Scientific Safety Review Workgroup.

Qoondoyntii bilawga ah tallaalka Pfizer ee gobolku qoondeeyay ayaa la bilaabay in loo soo raro Oregon toddobaadkani wuuna sii socon doonaa. Dhowrka toddobaad ee soo socda, farmashiyayaasha, xarumaha caafimaadka oo federaal ahaan la aqoonsan yahay, iyo xafiisyada dhakhtarka, iyo xarumaha tallaalka COVID-19 ee gaarka ah ayaa la diyaarin doonaa si loo tallaalo carruurta. Agaasimaha Caafimaadka Dadweynaha ee gobolka ayaa soo saaray amar farmashiistayaasha Oregon u oggolaanaya in ay tallaalada COVID-19 iyo tallaalada hargabka 'flu' siiyaan carruurta.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha ku dhiirigelinaysa in ay la hadlaan dhakhtarka iyo

farmashiistaha si ay su'aalhooda uga jawaabaan. OHA ayaa haysa Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo oo ka hadlaaya su'aalaha caamka ee ku saabsan tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay 5 ilaa 11 jirka.

Commented [YA1]: Link when have document

Hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaasha taageera carruurta qabta naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) waa in ay la xiriir la sameeyaan qoysaska iyo mas'uuliyiinta oo ku xiraan fursadaha tallaalka ee ka jira degaankooda.

OHA ayaa leh [foomka taageerada farsamo](#) halkaasi oo daryeel bixiyayaasha, hay'adaha maamulka kiiska iyo dadku/qoysasku ay codsan karaan taageerada helitaanka tallaalka COVID-19. Gaar ahaan, foomka waa in ay isticmaalaan daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay ee leh dad degan iyo shaqaale u baahan taageerada tallaalka, ama dadka helaya adeegyada guriga-dhexdiisa ee, sabab kasta ha ahaatee, aanan gurigooda ka bixi karin si ay u helaan tallaalka. Hay'adaha maamulka kiiska waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay foomka u buuxiyaan dadka ka tirsan adeegyada ee ay dhici karta in ay u baahdaan helitaanka tallaalka.

Haddii aad isla hadaba codsi u gudbisay ODDS si ay taageerto ilme qaadanaya tallaalka COVID-19 isaga oo jooga gurigiisa u gaarka ah oo ay sabab u tahay awood la'aanta helitaanka dhacdada bulshada ama farmashiyaha ganacsiga, ma jirto baahi ah in dib loo gudbiyo xogta. ODDS waxay si toos ah macluumaadka ula wadaagtay OHA.

Xirmada tallaalka ee OHA ayaa leh ilo, ay ku jiraan goobaha tallaalka, 211 info, xaqiiqooyinka tallaalka iyo kuwo kale oo badan. OHA ayaa haysta macluumaad ku jira boggeeda internet-ka oo loogu talagalay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta: <https://govstatus.egov.com/or-oha-covid-19-vaccine-parents-guardians>

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.